focus on facts

Xuquuqda Caafimaad iyo Ammaan ee Goobshaqo Ee Gobolka Manitoba

Xeerka Ammaan iyo Caafimaad

Xuquuqda ammaanka iyo caafimaad ee goobshaqo Waxaa ballan qaadaya, Qodob-sharciyeedka Ammaanka iyo Caafimaad ee Goobshaqo iyo *Wareegtada Xeerka Shaqada* ee Canada. Shaqaalaha adankoodu waxay hoos yimaadaan maamulka gobolka, sidaa daraaddeed, isaga ayaa masuul ka ah ammaanka iyo caafimaadka ee goobta shaqada.

Shaqaalaha u shaqeeya goobaha adeega shacabka ee federaalka, shirkadaha federaalka ama bangiyada, gaadiidka, isgaadhsiinta iyo warshadaha badarka, waxay hoos yimaaddaan maamulka federaalka. waxaana masuul ka ah Wareegtada Xeerka Shaqada ee Canada

Warqaddani waxay guudmar ku sameyneysaa noocyada xuquuqaha ee uu dammaanaqaado *Qodob-sharciyeedka Ammaanka iyo Caafimaad ee Goobshaqo* ee gobolka Manitoba. Xuquuqaha badbaado iyo caafimaad ee uu dammaano qaado Wareegtada Xeerka Shaqo ee Canada wax badan ayuu ka shabbahaa kan Manitoba, laakiin isku mid ma aha. Shaqaalaha uu xuquuqdooda dammaana qaado xeerkaas federalku, halla xidhiidhaan Xafiiska Horumarinta Shaqaalaha ee Canada “Human resource Development of Canada” ama ururrada shaqaalaha.

> Shaqaalaha reer Manitoba wuxuu sharcigu siinayaa 3 dammaanad oo buuxda oo la xidhiidha ammaankooda & caafimaadkooda
>
> - Xuquuqda inaad wax ogaatid
> - Xuquuqda inaad ka qaybgashid
> - Xuquuqda inaad diidid
>
> Shaqaalaha ku jira ururada shaqaalaha iyo kuwa aan ku jirinba sharcigu isku si ayuu u dammaana qaadayaa.

Saddex Xuquuqood Ee Ammaan Iyo Caafimaad

1. Xaqa aad u leedahay in aad wax ogaatid

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ogaadaan wixii khatar ka jiri kara goobta shaqada. Dadka loo shaqeeyo sharcigu wuxuu farayaa inay u sheegaan kuna tababaraan shaqaalahooda khataraha ka jira goobtaas shaqada iyo sida ugu habboon ee loogu shaqeyn karo.

Shaqaalaha waxaa kale oo dammaanad qaada Wargalinta Laga Qoray Waxyaabaha Khatarta ah ee Goobta Shaqada “Workplace Hazards Material Information System” WHIMS. WHIMS-ku wuxuu ka dalbayaa qofka loo shaqeeyo in uu:

- calaamadeyo weelka ay ku jirto alaabta khatarta ah ah.
- bixiyo warqad wax ka sheegaysa khatartaas alaabta Material Safety Data Sheet (MSDS)
- siiyaa shaqaalaha warbixin ku saabsan khatarta ay alaabtu leedahay iyo siday si badbaado leh ugu shaqeyn lahaayeen.

Xaashida Material Safety Data Sheet (MSDS) ee ay ku qorantahay macluumaadka waxyaabaha khatartu ka kooban tahay waxaa qora warshadaha soo saara alaabtas, waxayna ku caddahay meesha ay ku qorantahay sheey walba oo ka mid aha alaabtaasi waxa ay ka kooban yahiin (ingredients), iyo xaashida la socota ee ka hadlaysa, sida la isaga ilaalin karo in lala kulmo khatartaas.

Waxaa lagama maarmaan ah in MSDS-ka iyo sidii ay uga digtoonaan lahaayeen waxyeelada khatartaas in la siiyo shaqaalaha oo dhan.

2. Xuquuqda ka qaybgalka

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay ka qaybgalaan macluumaadka la xiriira badbaadada iyo xaalada caafimaad ee goobtooda shaqo. Shaqaaluhu waxay isticmaalaan xuquuqdooda,si ay ula shaqeeyaan ugana qaybgalaan Guddiga Ammaanka iyo Caafimaad ama wakiilkooda u qaabilsan badbaadada iyo caafimaad ee goobta shaqo.

Guddiga Ammaanka Iyo Caafimaad Goobshaqo

Goobtii ay ka shaqeynayaan 20 qof ama wax kabadan oo shaqaale ahi, waxaa laga rabaa in ay sameystaan guddi isku dhaf ah, oo ka kooban in isla’eg oo ah shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha.

Ka Qaybgalka Guddiga

Shaqaaluhu waxay xaq uleeyihiin inay go’aansadaan qofka iyaga matalaya ee guddiga ku jira. Wakiilka shaqaalaha waxaa dooran kara dadka uu la shaqeeyo ama waxaa magacaabi kara ururkoda shaqaalaha. Magacyada xubnaha guddigaas waa in lagu dhajiyo goobta shaqada si qof walbo u arki karo

Waajiba Guddiga

Guddiga Iskudhafka ah ee Ammaanka iyo Caafimaadka ee Goobshaqo waa in ay shiraan ugu yaraan 1 mar 3dii biloodba. Guddigaasi wuxuu kormeera goobaha shaqada, wuxuu darsaa shilalka ka dhaca goobaha shaqo, wuxuu ka qayb galaa xuquuqda diiddidda baadhitaanka goobshaqo, isla markaan wada hadal ka galaa dhibaatooyinka ka jira goobaha shaqada, si xal loogu helo. Waxaa lagama maarmaan ah in ay shaqaaluhu u sheegaan wakiilkooda ku jira guddiga wixii la xidhiidha ammaan darro iyo caafimaadka goobta shaqada.

Tababarka Guddiga

Dadka loo shaqeeyo waa in ay siiyaan 2casho sanadkiiba xubnaha guddiga badbaadada iyo xaalada caafimaad inay bartaan waxbarasho la xidhiidha badbaadada iyo marxalada caafimaad iyaga oo aan waxba ka jarayn mishaarkooda ama manaafacaad kaleba.

MFL Occupational Health Centre

Published by the MFL Occupational Health Centre • 102-275 Broadway • Winnipeg MB • R3C 4M6 • 949-0811

Wakiilka Ammaanka Iyo Caafimaadka E Goobshaqo

Goobaha shaqo ee shaqaalaheedu u dhexeeyaan 10 ilaa 19 waa in ay yeelataa wakiil u qaabilsan ammaanka iyo caafimaadka. Wakiilkani waa inuu magacaabo ururka shaqaaluhu ama ay doortaan shaqaaluhu. Wakiilkani waa in uusan xubin ka ahayn maamulka goobta shaqo.

Magaca wakiilka waa in lagu dhajiyo goobta shaqo si qof waliba u arko. Waajibka wakiilka ammaanka iyo caafimaadka ee goobta shaqo wuxuu la mid yahay kan guddiga ammaanka iyo caafimaadka

3. Xuquuqda in aad wax diidi kartid

Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay diidaan in ay qabtaan shaqada haddii ay haystaan sabab macquul ah inay shaqadu ama marxaladda shaqadu ay khatar ku tahay iyaga laftooda, shaqaalaha kale ee la shaqeeynaya ama qof kaleba.

Waxaa jira **4 Tallaabo oo** la raaco si aad u diiddo shaqada waxyeelada leh. Shaqaalaha shaqada lagama joojinkaro, lama eryi karo, lamana ganaaxi karo haddii ay diidistaas u maraan 4-ta tallaabo ee saxda ah:

Tallaabada 1aad — Horjoogahaaga ku wargali diidmadaada iyo waxa aad ka cabanaysoba.

Tallaabada 2aad — Dadka loo shaqeeyo haddii ay si dhakhso ah wax uga qaban waayaan khatartaas, guddoomiyaha guddiga shaqaalaha ee wakiilka ah iyo qofka loo shaqeeyo waa inay si dhakhso leh u baaraan dhibaatadan, si fiicana ula fiiriyaan shaqaalahan shaqada diidan.

Qofka loo shaqeeyo wuxuu xaq u leeyahay inuu shaqo kale u dhiibo qofkan shaqadan diiddan.

Qofka loo shaqeeyo qabo kuma oran karo shaqaale kale shaqadii la diiday, iyadoon:

- loo sheegin in shaqaale kale shaqadan diday ama uusan sarkaalka guddiga ammaanka iyo badbaaddu wargalinnin, ama
- iyadoon loo sheegin sababta loo diiday shaqadan.

Tallaabada 3aad — Haddii aan wax laga qaban khatartaas Marka la baadho kaddib, shaqaalihii, qofkii loo shaqaynayay ama guddiga shaqaaluhu waa inay u yeeraan sarkaal ka socdo waaxda ammaanka iyo caafimaadka ee goobta shaqo si uu u darso dhibka jira.

Tallaabada 4aad — Sarkaalka waaxda Ammaanka iyo Caafimaad wuxuu xaaladda la fiirin shaqaalahan, qofka loo shaqeeyo iyo wakiilka guddiga shaqaalaha. Sarkaalkan waaxda Ammaanka iyo Caafimaad haddii uu u arko in dhib jiro, wuxuu warbixin u diri qofka loo shaqeeyo si uu wax uga qabto dhibka jira. Hadii uu sarkaalku go'aansado in ayna shaqadu wax khatar ah lahayn, shaqaaluhu waa inuu ku noqdo shaqada.

Rafcaan Qaadasho

Shaqaaluhu iyo qofka loo shaqeeyo waxay haysataan 14 maalmood gudahood in ay ku qaataan rafcaan.

Meelaha Aad Warbixin Ka Heli Kartid

Goobo badan oo Manitoba ku yaalla ayaad ka heli kartaa warbixin afka lagaaga sheego, mid qoraal ah ama waano la xiriirta ammaanka iyo caafimaadka goobtashaqo.

Waxaad kalood kala hadashaa arimaha la xiriira badbaadada iyo xaalada caafimaad adiga oo la tashada wakiilka ammaanka iyo caafimaad ee goobtashaqo

Wiixii faah faahin ah kala xiriir

MFL Occupational Health Centre
102-275 Broadway
Winnipeg, Manitoba R3C 4M6
Toll Free: 1-888-843-1229
Ph: (204) 949-0811
Fax:(204) 956-0848
Email: mflohc@mflohc.mb.ca
Website: www.mflohc.mb.ca

Workplace Safety and Health Division Regional Offices

Winnipeg
200-401 York Ave
Winnipeg, MB R3C 0P8
Ph: (204) 945-3446
Toll Free 1-800-282-8069

Brandon
340 9th St.
Brandon, MB R7A 6C2
Ph: (204) 726-6744

Stonewall
336 Main St.
Box 1249
Stonewall, MB R0C 2Z0
Ph: (204) 467-4790

Beausejour
639 Park Ave.
Box 50
Beausejour, MB
R0E 0C0
Ph:(204) 268-6044

Flin Flon
202-143 Main Street
Flin Flon, MB
R8A 1K2
Ph: (204) 687-1624

Snow Lake
Box 520
Snow Lake, MB
R0B 1M0
Ph: (204) 358-2392

Thompson
59 Elizabeth Drive
Thompson, MB
R8N 1X4
Ph: (204) 677-6820

Human Resources Development Canada - Labour Program
2nd Floor, 391 York Avenue
Winnipeg, Mb R3C 0P8
Ph:(204) 983-6375

July 2009